

## **Ka Ergisashada Wireless Hotspot Springfield City Library**

Waxaad ka ergisan kartaa wireless hotspot Springfield City Library!

*Barnaamijka Hotspot waxa uu taageeraa yoolka Gudoomiyada Gudida Laybareeriga ee Hormarinta Helitaaka Loo Siman Yahay ee Khayraadka iyada oo loo ololaynayo "xidhiidhka wanaagsan iyo qaab dhismeedka teknooloojiyada, tobobarka, iyo qaabka shaqada ee taageerada in si siman loo buuxiyo baahida laybareeri ee isticmaalayaasha ku sugan Massachusetts" iyo Hay'ada Carwada iyo Adeegyada Laybareeriga Sharciga Caymiska Samato Bixinta ee 1.1 si kor loogu qaado kawada qayb galka dhijitaalka.*

Cid kasta oo ka socota dawlad hoose oo shahaado ka haysata barnaamijka Kaalmada Gobolka ee Laybareeriyada Shacabka ee Gudida Massachusetts ee Gudoomiyaha Laybareeriga waxa uu iminka u qalmaa inuu ergisto hotspot. Isduwaan gelinta Patron ee nidaamka gudihiisa ayaa loo baahan karaa.

### **Waa kuwan dhawr shay oo ay tahay inaad ogaato kahor inta aanad rgisan hotspot-ka:**

Dadka ergisanaya hotspot-ku waa inay ahaadaan 18 jir oo waa in xidhiidh wanaagsan ka dhaxeeyaa laybareeriga.

Kaliya hal hotspot ayaa qoyskii loo ogol yahay. Halkii hotspot waxa uu ka shaqaysiin karaa ilaa 10 aaladood oo ku xidhan.

Hotspot-yada waxaa la ergisan karaa ilaa 14 maalmood. Hadii aab hotspot-ka aan lagu soo celin 3 maalmood gudahood kadib marka la gaadho taariikhda uu ku eeg yahay, adeega waa la bakhtiin doonaa oo hotspot-ka lama isticmaali karo. Dib u cusboonaysiinta lama ogola.

Hotspot-ka waa in laga ergistaa oo loo celiyaa xafiiska hore ee laybareeriga. Fadlan adiga oo gacanta ku wada usoo celi aalada xubin shaqaalaha ku sugan isla goobta laybareeriga ee aad ka ergisatay si markaa looga masaxo kaadhka laybareeriga oo qofka xigaa u qaadan karo. HAKU ridin hotspot-ka sanduuqa lagu rido buugta.

Hotspot-yada waa in lala soo celiyaa xadhiga dabka, tilmaamaha, iyo shandada lagu qaado isaga oo wata Laybareeriga oo u shaqaynaya sidii lagugu siiyay. Fadlan soo celi hotspot oo aad dabkiisa soo buuxisay.

Inta uu qofku haysato, hotspot-ka waxaa ka masuul ah cida ergisatay. Cida ergisatay waxay u hogaansami doontaa siyaasada isticmaalka la ogol yahay ee internetka laybareeriga marka la isticmaalayo hotspot-ka mobile-ka. Wixii isku day ah ee in wax laga badalo buuxinta hotspot waa mamnuuc oo waxay keeni kartaa in la waayo xuquuqdii ergisashada.

Hotspot-yada waxaa lagu buuxiyay in lagu isticmaalo waxyaabaha waxbarasho ee T-Mobile ay filtergaraysay. Cida ergisanaysaa waxay dalban kartaa in laga bakhtiiyo filterka hotspot marka ay qaadanayaan aalada. Laybareerigu ma waydiin doono sababta uu qofku u dalbaday in la bakhtiiyo filterka.

Hadii hotspot uu waxyeeloobo, ama aanu shaqaynaynin, waxaad kusoo celisaa xafiiska wareejinta laybareeriga oo waxa aad u sheegtaa waxyeelada qof shaqaalaha ah.

Isticmaalayaasha Hotspot waxay interterka ka isticmaalayaan internet-ka T-Mobile, e maaha internet-ka Laybareeriga. Laybareerigu kama masuul aha wixii fayl, macluumaad ama macluumaadka shakhsi ahaaneed ee laga galo/gudbiyo iyada oo la adeegsanayo hotspot-ka.

Laybareerigu ma saarna masuuliyada waxyeelada tooska ah, dadban ama isasoo taraysa ee la xidhiidha isticmaalka hotspot mobileka, oo ay ku jirto waayitaanta macluumaadka, ama sirtaada la jabsado. Dadka isticmaalaya hotspot-yada wixii khatar ah ee ka timaada iyaga ayay saaran tahay oo wixii khasaare ah iyaga ayaa ka masuul ah ficiladooda.

Ficilka sharci darada ah ee agabka Laybareeriga ama adeegyada waxaa sidoo kale ka iman karta ciqaab maxkamadeed.

#### Isticmaalida Hotspot:

- Bakhtii hotspot adiga oo isticmaalaya badhanka bakhtiinta ee dhinaca kaga yaal hotspot.
- Daaqada akhriska ayaa soo bixi doonta oo wadata fariin soo dhawayn ah oo muujinaysa inuu shidan yahay
- Raac tilmaamaha aad ku geleyso magaca interterka laybareeriga iyo baaswoodhka.
- Waxaad ka heshaa internetka aaladaada oo dooro - marka lagu sheego, geli baaswoodhka
- Marka aanad isticmaalaynin, bakhtii hotspot adiga oo riixaya, oo haynaya, badhanka shiditaanka.

*Xasuuso inaad dabaysato hotspot si aad u xaqiijso in aad isticmaali karto marka aad doonaysa inaad gasho aaladaada. Si aad u dabaysato hotspot, waxa aad gelisaa xadhiga dabka hotspot oo waxa aad gelisaa fiishta. Daaqada soo baxaysa ayaa sheegeysa inta ay marayso dabaynta baytarigu.*

**Mushkilado? Wixii taageero farsamo ah ee ay bixiso T-Mobile waxaad ka heleysaa: (844) 341-4834.**



## Shaqaalaha Ayaa Isticmaalaya (Staff Use)

Taariikhday ku eeg tahay (Due date): \_\_\_\_\_

Magaca Isticmaalaha (Borrower Name): \_\_\_\_\_

Lambarka Taleefanka (Phone #) \_\_\_\_\_

Lambarka Kaadhka Laybareeriga Daymaystaha (Borrower Library Card Number): \_\_\_\_\_

Cinwaanka Iimeelka Daymaystaha (Borrower Email Address): \_\_\_\_\_

Cinwaanka Daymaystaha (Borrower Address): \_\_\_\_\_

Ergistuhu waxa uu qaatay **Hotspot** lambar \_\_\_\_\_ oo wata lambarka baarkoodhka: \_\_\_\_\_  
(Borrower received **Hotspot** #) (with barcode #)

Filterka waa la bakhiiyay (Filter disabled) \_\_\_\_\_

Saxeexa Ergistaha (Borrower Signature): \_\_\_\_\_ Taariikhda (Date): \_\_\_\_\_

Taariikhda bixitaanka \_\_\_\_\_ Xarfaha Uruuriska Magaca Shaqaalaha \_\_\_\_\_  
(Checked out date) (Staff Initials)

Taariikhda bixitaanka \_\_\_\_\_ Xarfaha Uruuriska Magaca Shaqaalaha \_\_\_\_\_  
(Checked out date) (Staff Initials)